Adeegyada Xarunta Ku Saleysan (Da'aadda 3+)

AF-FIITNAAMEES

AF-ISBAANISH

AF-SOOMAALI

AF-CARABI

AF-AMXAARIK

Waxaan hadda ku jirnaa Marxaladda 3aad ee qorshaha Washington Caafimaadqabta (Healthy Washington). Bukaan-eegtada Xarunta Daaweynta ee Carruurta (da'aadda 3+) ayaa hadda awooddi doonta in ay bixiso kartida sii korortay ee adeegyada Tooska ah iyo Kuwa Isku-dhafan (ee xagga hoose).

Bedqabkaaga iyo kan qoyskaaga iyo sidoo kale bedqabka adeeg bixiyeyaasheenna iyo hawlwadeennada taageerada ayaa weli sii ah mudnaanteenna ugu sarreysa. Qorsheyaasheenna ayaa si dhow ula janqaadaya qorsheyaasha Washington Caafimaadqabta (Healthy Washington) ee dowladda. Waa in aynu raacno dhammaan shuruucda CDC, Waaxda Caafimaadka iyo dowladda.

*__Adeegyo Meelo Fogfog Laga Bixiyo:__ Dhammaan adeegyada ayaa meelo fogfog laga bixiyaa iyada oo loo marayo shirarka fiidiyowga (telehealth) iyo xiriirka telefoonka.
*__Qaabka Adeegga Isku-dhafan:__ Qoysaska ayaa la siiyaa 2 kulamo bishii oo nooca telehealth ah iyo 2 kulamo oo bukaan-eegta lagu bixiyo. Adeeg-bixiyayaasha ayaa bukaan-eegtada jooga laba maalin toddobaadkii oo jadwal wareegto ah.
*__Awoodda Sii Korortay ee Adeegyada Tooska ah iyo Kuwa Isku-dhafan:__ Sii-wad bixinta qaababka isku-dhafan iyo telehealth. Adeeg-bixiyeyaasha ayaa kordhin kara maalmaha bukaan-eegtada waxayna ka dhigi karaan 3 ama 4; qoysas tiro xaddidan ayaa heli kara booqashooyinka adeegga toos ah oo dheeraad ah.
*__Adeeg Toos ah:__ Qoysaska waxaa ay ku noqon karaan adeegga tooska ah ee toddobaadlaha. Adeeg-bixiyeyaasha waxay ku noqon karaan shaqada bukaan-eegtada oo waqti buuxo ah. Adeegyada Telehealth ayaa la sii heli doonnaa.

Qorshahan waa mid daganeyn wuunna isbeddeli karaa, iyada oo ku xiran dhaqdhaqaaqa fayraska ee bulshooyinka. Fadlan ogow in aan kula soo socodsiin doono isbeddelo kasta.

Waxaa naga go'an in aan idin taageerno adiga iyo cunugaagaba habka ugu amaansan ee suuragalka ah. Waad ku mahadsan tahay fahamkaaga iyo dulqaadkaaga. Fadlan aan oggaado haddii aad qabto su'aalo dheeraad ah. Waxaad igala soo xiriiri kartaa 253-216-0845 ama jodi@ctckids.org.

Si daacad ah,

Jodi VanVleet, Agaasimaha Barnaamijka Xarunta